



## Talooyin asaasi ah oo loogu talo galay tamar-marxinta/keydinta xilliyada kulaylinta iyo Qaboojinta

### XAGAAGA

Ka durki nalalka, Taleefishinada, iyo qalabka kale heerkul xaddidahaaga.

Xir albaabada iyo daaqadaha marka uu qaboojiyaha/mukayfku kuu daaran yahay, si aad hawada qabow gudaha ugu hayso.

Nidaamka Qaboojiyahaaga/Mukayfkaaga haloo baaro si sannadle ah.

Shaandhooyinka/Filtarka qaboojiyaha/mukayfka u bedel sida laguugula taliyey.

Agagaarka dibadda qaboojiyaha/ mukayfka ka nadiifi dhirta/caleenta iyo wixii kale ee xannibaya hawo-mareenka.

Duubabka/xarkaha qaboojiyaha/mukayfkee dhanka dibada ka nadiifi caleemaha, boorka iyo qashinka kale; ku buufi tuunbada si aad u nadiifiso.

Daaqadaha qaybaha qaboojiyaha/mukayfka waxay u baahan yihiin in shaandhooyinka/filtarka laga nadiifiyo, tuunbooyinka biyaha qaada ay banaan yihiin oo dhinac u duwan yihiin, daboolo sax ahina u kala dhexeeyaan daaqada iyo qaboojiyaha.

Dami/Baqtii layrka/nalka iyo marawaxadaha markaanad qolka ku jirin

Isticmaal/Adeegso haweynta guriga ee dabiiciga ah markay suurtoagal tahay. Daaqadaha furo oo qaboojiyaha dami hadii ay qabow tahay habeenkii iyo subaxdii.



Isticmaal daaqado leh hagaajinta tamar-keydinta sida shiraacyada, daahah iyo maro oo xir marka ay tahay maalintii si aad uga dabooشو in ilayska cadceeda iyo kulaylka debada ka imanaya dibada.

Isticmaal marwaxadaha saqafka sare ku xiran markaad qol ku jirto. Dami marawaxadaha markaad qolka ka baxdo; marawaxaduhu qofka ay qaboojiyaan, qolka ma qaboojiyaan iyagoo sameynaya saameyn hawo qabooban.

Xaddid kulaylka ka imaanaya qalabada gudaha guriga. Dibada wax ku karso, iskuna day inaanad isticmaalin qasaalada, qallajiyaha, ama suxuun mayraha xilliyada kuleylku aad u sareeyo.

Adeegso marawaxad hawo-bixisada ah markaad mayranayso ama cunto karsanayso si ay huurka iyo kulaylka gurigaaga uga saarto.


Ka dhig heerkul xaddidahaaga diirimaad raaxo leh (78°F) Markaad guriga joogto 10 digrii ka sarraysii intaas markaad maqan tahay.



# Talooyin asaasi ah oo loogu talo galay Tamar-Marxinta/Keydinta Xilliyada kulaylinta iyo Qaboojinta



## JILAALKA/QABOобаHA



Ku samee baaritaan qalabka kulaylinta ka hor intaanu soo gelin xillig kulaylinta.

U beddel shaandhooyinka/filterka kulayliyaha sida lagugula taliyey.

Albaabada iyo daaqadaha xir si aad hawada diiran gudaha ugu hayso.

Eeg in CO gartayaasha iyo alaamka/qalabka digniinta qiiqa/dabka ayshaqaynayaan; beddel baytariyada sannad kasta.

Mari dareeraha caaga ah ee gudaha (“duubka yaraada”) hareeraha daaqadaha si aad u dhinto hawada baxsanaysa.

Ku samee daaqadaha iyo albaabada lingax cimileed, hadii loo baahdo, si aad uga hortagto soo gelida hawada.

Ka dhig heerkul-xaddidahaaga heerkulka ugu qabow ee la oggolyahay marka guriga la joogo inta lagu jiro xilliga kullaylinta; ka hoosaysii 8-10 digrii marka guriga laga maqan yahay.

Hoos ugu dhig heerkulka biyo kulayliyahaaga ilaa iyo 120°F.

Ka fur daahaha iyo beersoolada daaqadaha ujeedo koonfur si ay cadceedu/quraxdu u soo gasho marka lagu jiro maalinta oo si dabiici ah u diiriso gurigaaga, habeenkiina xir si aad u yarayso dhaxanta ka imanaysa daaqadaha qaboow.

Ku qabeyso muddo gaaban – biyo dhac/xoog hoose leh – halkii aad isticmaali lahayd qubayska barkada si aad u dhinto isticmaalka biyaha kulul.

Adeegso/isticmaal xarkaha nalalka qurxinta wakhtiyada fasaxa ee ahdiyoodka soo saara iftiin – ama LED –si aad u yareeyso kharashka sharaxaadda guriga ee kaaga baxaya xilliyada fasaxa.

Ka eeg calaamadda ENERGY STAR® markaad iibsanaayo alaabada guriga.

